

# Ogaysiiska la Kulanka ee Qoyska – Mononucleosis

Gacaliye Qoys:

Ilmahaagu waxa dhici karta inuu qaaday **Mononucleosis**. Waa xanuun fayras keeno oo sida badan loo yaqaan “mono”.

**Waa maxay astaamuhu?** Aad u sahlan marka la eego carruurta yaryar Xummad, cune xanuun, daal iyo qanjidhada difaaca oo barara. Guud ahaan aan dareemayn caafimaad. Astaamuhu waxay socon karaan hal ilaa dhawr toddobaad.

**Sidee ayey ku faaftaa?** Taabashada qof ilaa qof ee candhuufta qofka xanuusan (sida dhunkashada ama wadaagista shayada wasakhaysan).

**Goorma ayey astaamuhu bilaabmaan?** Qiyaastii 4-6 toddobaad kadib qaadista.

**Ma loo baahan yahay ilmaha in guriga lagu hayo?** Maya, ilaa ilmuhu uu yeesho xummad iyo/ama aanu awoodin inuu kaqaybqaato hawlaha.

Haddii ilmahaagu muujiyo wax kamid ah calaamadahan, waa inuu la kulmo Bixiyaha Daryeelka Caafimaadkaaga. Hubso inaad u sheegto bixiyahaaga in ilmahaagu uu qaaday mononucleosis. Dhaqtarka ilmahu waxa dhici karta inuu u baahdo inuu sameeyo baadhish shaybaadh si ay ugu caddaado ogaansuhu. Ma jiro daawayn u gaar ah mononucleosis. Haddii ilmahaaga lagu ogaado in uu qabo mononucleosis fadlan ogaysii macalinkaaga Head Start/ECEAP.

Shaqaalaha: \_\_\_\_\_ Taleefanka: \_\_\_\_\_

Xarunta: \_\_\_\_\_